**Dadka ka yimaada wadamada midowga Yurub, Norway, Iceland, Liechtenstein, Iswizerland ama Ingiriiska**
Haddii aad ceymis ugu jirto mid ka mid ah wadamada soo socda waxaad bixineysaa kharash u dhigma kan ay dadka Iswiidhan deggan ka bixiyaan gargaarka degdega ah ama daryeelka lagama maarmaanka ah:
Wadan EU (midowga yurub)- ama EES ka mid ah, Ingiriiska, Iswizerland.

***Kaarka caymiska caafimaadka Yurub = Kaarka Yurubta midoobay (EU)***
Waa inaa tustaa kaarka caymiska caafimaadka Yurub. Waxaa kaloo lagu magacaabaa Kaarka-EU ama kaarka-GHIC/EHIC. Haddii aadan muujin karin mid ka mid ah kaararkaas waxaa lagugu soo dallacanaa kharashka oo buuxa oo ah daryeelkii caafimaad ee aad heshay. Kaarka caymiska caafimaadka Yurub waxaad ka dalbaneysaa wadanka aad caymiska uga jirtid. Caruurta xitaa sidoo kale waa inay haystaan kaarka-EU.

**Dadka ka yimaada wadan aan ka mid ahayn EU, EES, Ingiriiska ama Iswizerland**
Inta badan dadka ka yimaada wadan ka baxsan EU, EES, Iswizerland ama Ingiriiska waa inay iska bixiyaan kharashka oo dhan haddii ay Iswiidhan uga baahdaan daryeel caafimaad. Tani waxay khuseysaa daryeelka caafimaadka gargaarka degdega ah, daryeelka lagama maarmaanka ah iyo daryeelka qorsheysan. EES waxaa ku jira Norway, iceland iyo Liechtenstein.

**Iswiidhan waxay heshiisyo la leedahay wadamo gaar ah**
Iswiidhan waxay heshiis gaar ah la leedahay wadamo qaar dhinaca daryeelka caafimaadka. Dadka wadamaas ka yimaada wxay bixinaayaan kharash u dhigma kan ay daryeelka caafimaad ka bixiyaan dadka caymiska ku leh Iswiidhan. Wadamada ay Iswiidhan la leedahay Heshiiska ayaa kala ah: Australia, Algeeriya, Israel, Turki, Maamul goboleedka Quebec ee Kanada.

**Haddii ad qorsheyneysid inaa joogtid Iswiidhan**
Haddii aa codsatay, ama aad heshay sharci degganaasho ama shaqo oo aad u baahantahay daryeel caafimaad ka hor intaadan iska diiwaan gelin hay'adda canshuuraha inta badan waa inaa adiga iska bixisaa kharashka daryeelka caafimaadka.

Postadress: Region Örebro län, Box 1613, 701 16 Örebro, E-post: regionen@regionorebrolan.se
Besöksadress: Eklundavägen 2, Örebro, Telefon: 019-602 70 00, Fax: 019-602 70 08

www.regionorebrolan.se

Region Örebro län, 2023

Somaliska/ Soomaali

# Daryeelka caafimaadka Iswiidhan haddii aad ka timid wadan kale

Region Örebro län

### Tarjumida luqadaada
Waxaa lagaa caawinaa inaa hesho turjubaan haddii ay kugu adag tahay inaa fahamto ama ku hadasho luqada Iswiidhishka. Haddii ay suurtogal tahay hore ula xiriir xafiiska qaabilaada oo u sheeg inaa turjubaan u baahantahay marka aad booqaneysid daryeelka caafimaadka

### Waajibka sir ilaalinta
Dhamaan shaqaalaha caafimaadka Iswiidhan waxaa saaran waajib sir ilaalin ah. Tani waxay ka dhigantahay in xogtaada aysan la wadaagi karin qof ka baxsan daryeelka caafimaadka idin la'aantada. Tani waxay khuseysaa dhamaan shaqaalaha aad kula kulantid daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan turjubaanada iyo shaqaalaha farmashiyaha.markaad codsaneyso daryeel caafimaad waxaad sheegeysaa magacaaga, cinwaankaaga, wadanka aad ka diiwaan gashantahay iyo inaa cidsatay oggolaansho aad ku joogto Iswiidhan.

### Daryeelka caafimaadka Iswiidhan haddii aad ka timid wadan kale
Galkaan waxaad ka heleysaa warbixin guud oo ku saabsan qofka wadan kale ka yimaada ee daryeel caafimaad u soo doonta Iswiidhan

Dalka Iswiidhan waxaa marwalba xaq u leedahay daryeelka gargaarka deg dega ah. Tani waxay khuseysaa xitaa haddii aad wadan kale ka imaatay oo xanuun kugu soo boodo intaa Iswiidhan joogto. Kharashka aad bixineyso intuu la'egyahay waxay ku xiran tahay wadanka aad ka timid. Xaaladaha qaarkood waa inaa adiga iska bixisaa kharashka oo dhan.

**Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan daryeelka caafimaadka Iswiidhan**
Ku sawir koodka QR telefoonkaaga gacanta si aad wax badan uga ogaatid daryeelka caafimaadka Iswiidhan. Bogga waxaa ka heleysaa macluumaad lagu tarjumay dhowr luqadood oo kala duwan.

### Daryeelka gargaarka deg dega ah
Mar walba waxaad xaq u leedahay in aad hesho daryeelka gargaarka deg dega ah, tusaale ahaan haddii uu kugu dhaco caabuq halis ah ama aad lug ka jabto oo u baahato in lagu kabo. Kharashka daryeelka gargaarka degdega ah waa kala duwan yahay waxayna ku xiran tahay wadanka aad ka diiwaan gashantahay oo aad caymis ugu jirto iyo haddii aad keeni karto dokumentiyada lagama maarmaanka ah ee kuu oggolaanaaya inaa xaq u yeelato in lagaa qaado kharash yar.

### Daryeelka lagama maarmaanka ah
Nooc kale oo daryeel ah waxaa loo yaqaan daryeelka lagama maarmaanka ah. Waxaa ka mid ah daryeelka xaaladaha xanuunada dabadheer ee qofka qabo noloshiisa oo dhan.

Waxaad xaq u leedahay inaa hesho daryeelka lagama maarmaanka ah haddii aad caymis uga jirto wadamada EU/EES, Iswitzerland, Ingiriiska ama Australiya. In wadan caymis looga jiro macnaheedu waa inaa ku jirto nidaamka caymiska bulshada ee wadankaas.

Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa qiimeynaaya heerka daryeelka aad u baahantahay.

Haddii aad u safreyso Iwiidhan si aad u raadsato daryeel caafimaad waxaa lagu magacaabaa daryeelka qorsheysan wuxuuna leeyahay shuruudo kale oo khuseeya.

### Waa imisa kharashka daryeelka?
Kharashka aad bixineysid inta uu la'egyahay markaad booqaneysid daryeelka caafimaadka waxay ku xirantahay wadanka aad ka timid iyo wadanka aad caymiska ugu jirto waxaa jira xeerar kala duwan oo dalal kala duwan ah.

### Dadka ka yimaada wadamada waqooyiga yurub
Haddii aad ka diiwaan gashantahay oo aad deggantahay wadamada waqooyiga Yurub waxaad bixineysaa kharash u dhigma kan ay dadka swiidhan deggan ka bixiyaan gargaarka degdega ah ama daryeelka lagama maarmaanka ah. Wadamada waqooyiga yurub waa: Danmark, Finland, Norway, Föröarna (jasiiradaha föröarna), Greenland, Island.
Waa inaa tustaa kaarkaaga aqoonsiga oo aad sheegtaa cinwaanka aad deggan tahay. Waxaa kale oo aad tusi kartaa kaarkaaga ceymiska Yurub. Haddii aadan tusi karin mid ka mid ah aqoonsiyadaan waxaa laguugu soo dallacanaayaa kharash buuxa oo ah daryeelka aad heshay.